



Racfaan Uga Qaadashada Macaashka Dadaweynaha Maxkamadda Degmada

Public Benefits Appeals to District Court

Ciddee ka xareysan karta racfaan manfacyo cayrta ku saabsan Maxkamada Degmadda?

Xogtan urursan waxaa loogu talo galay oo KALIYA dadka horey uga qeyb qaatay dhageysiga dadweynaha u furan ee gargaarka dadweynaha ee waaxda Adeegga dadweynaha ee loo soo diray go'aan ama amar. Racfaan u qaadashada Maxkamadda Degmada waa mid aad u cakiran. Waxaa wanaagsan in aad qareen qabsato ama caawinaad aad ka hesho adeegga maxkamadda.

MA AHA lambarka bulshada, ceymiska shaqo la'aanta ama dib u eegis lagu sameeyo dacwad ku saabsan diidmada adeegga ama gargaarka.

Haddii ay dacwadaadu ku saabsan tahay cabasho aad ka cabaneyso gobolka Minnesota oo si xun kuula dhaqmay, akhri xogta urursan ee [Waa Maxay Si Xun Ula Dhaqan Sidee Ayeysa U Saameyn Kartaa Shaqadeyda?](#)

Maxaan yeelayaa haddii aanan ku raacsaneyn go'aanka ay gaaraan DHS?

Haddii ay dhageysi kuu qabteen DHS oo go'aanka ama amarka ay soo saareen aadan ku raacsaneyn waxyaabo dhawr ah ayaad sameyn kartaa. Waxa aad xafiiska racfaanka wweydiisan kartaa in ay eegaan go'aankooda. Taas waxaa lagu magacaabaa dib u tixgelin . Akhri xogta urursan ee [Racfaan U Qaadashada DHS](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u tixgelinta.



MUHIM: Waajib kuguma aha in aad weydiiso dib u tixgelin haddii aad dooneyso in aad Maxkamadda Degmada racfaan u qaado si toos ah. Laakiin labada mar qura ma wada sameyn kartid. HAKA diiwaangelin maxkamadda racfaan haddii aad weydiisatay in dib loo eego. Waa in aad sugtaa ilaa aad jawaab ka hesho dib u tixgelinta.

Haddii aad horey u soo martay dib u tixgelinta oo aadan weli ku raacsaneyn go'aankooda AMA aad dooneyso in aadan weydiisan dib u tixgelin, racfaan ayaad uga qaadan kartaa maxkamadda degmada.

Fiiro gaar ah: Maxkamadda Degmada waa maxkamadda ku taal degmada aad degan tahay.

Racfaan miyaan ka qaataa?

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka ka dib dhageysiga dib u tixgelinta, haddii aad dooratay in aad weydiisato dib u tixgelin, waxa aad racfaan u qaadan kartaa Maxkamadda Degmada. LAAKIIN U FIIRSO-inta badan dacwadaha lagu guuldareysto dhageysiga DHS **ma aha** kuwo ku wanaagsan

racfaan ka qaadasho. Racfaanka Maxkamada Degmada laguma helo ra'yi cusub. Kuuma ogolaaneyso in aad dhageysi cusub dib u soo bilowdo.

Maxkamadda Degmadu waxa ay eegtaa oo kaliya khaladaad waaweyn dhacay oo wax ka bedeli kara go'aankii hore. Hadii racfaanka DHS uu u dhaco si cadaalad ah iyo sida sharcigu dhigayo, Maxkamaddu Degmadu ma bedesho go'aanka.



Racfaan ka qaado oo kaliya haddii:

- Ay jirto sabab sharci ah. Sida inaad soo bandhigi karto in go'aanka DHS yahay mid aan sharciga la raacin.
AMA
- Aad heyso cadeyn cusub. LAAKIIN waa in ay jirtaa sabab muujineysa in cadeynta aadan heysan amarkii hore.

Sababtaas darteed, isku day in aad **la tashato qareen ka hor inta aadan racfaan ka diiwaan gelin Maxkamadda Degmada**. In aad la tashato waxa ay ku caawineysaa marka aad dacwad xoog leh heysato oo racfaan loo qaadan karo. Waxa kale oo qareenku kaa caawinayaa inuu kaala taliyo in aad racfaan qaadato iyo in kale.

Xafiiska dhanka sharciyada (legal aid) ee deegaankaagu waxaa dhici karta inuu awoodo inuu ku siiyo talo ama gudbin. Si aad u hesho kan deegaankaaga, wac 1-(877) 696-6529. Ama ka raadi caawimaad barnaamijyada kale ee ku jira barta www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waa maxay dacwadda racfaanka ku wanaagsan?

Dood Xagga Sharciga Ah: si aad ugu guuleysato racfaanka Maxkamadda Degmada waa inaad soo bandhigtaa in amarka DHS uu yahay mid aad sax aheyn maadaama la adeegsaday sharcio aan xaaladda ku habooneyn ama aysan jirin cadeyn ku saleysan xaqiiqada oo u taagan waxyaabaha dhacay. Xaqiiqda ah inaad ku raacsanayn makhraati furka ama daliilaha ay qolada kale soo bandhigtay kuma filna inaad ku guulaysato racfaanka.

Cadeyn Cusub: haddii aad heyso cadeyn cusub OO ay jirto sabab macquul ah sababta aadan u soo bandhigin dhageysigii ugu horeeyey oo laga yaabo in ay kaa caawin laheyd in aad ku guuleysato dacwada. Sida haddii aadan ogeyn in ay jiraan qoraalo caawin kara dacwadaada markii ugu horeysay laakiin aad iminka heysato.

Kuwani waa qaar ka mid ah dacwadaha ku wanaagsan racfaanka:

- Sharciga ayaa isbedelay kolkaa dakhliga qaarkii laguma daro xisaabta MFIP, laakiin xaakimku waxa uu adeegsaday sharcigii hore ee la bedelay.
- Cayrtu waxa ay tiri aabaha ilmahaaga dhalay waa uu kula nool yahay. Xaakimkuna waa ku raacay waayo kama aad haysid ciwaan kale aabaha. Ka dib dhageysiga dacwada waxaa aad ogaatay in aabaha la xiray. Kolkii aad heshay warbixinta bilayska xiray uu qorayna waxaa ku qoran ciwaan kale oo uu leeyahay.

Waa maxay dacwadda racfaanka aan ku wanaagsaneyn?

Waxaa jira dacwado sharcigu cad yahay inkasta oo laga yaabo in ay cadaalad daro kuula ekaato. Dacwadaha **aan** ku wanaagsaneyn racfaanka waxaa ka mid ah:

Tusaale dacwadaha aan racfaanka ku wanaagsaneyn waxaa ka mid ah:


- Sharcigu waxa uu dhigayaa in aad racfaan ku qaadato 30 maalmood gudahood. Waxa aad racfaanka ku qaadatay 40 maalmood. Qaaligu wuxuu kugu yiri ma heysatid sabab wanaagsan marba haddii aad daahday.
- Maxkamadaha degmooyinku inta badan abadan ma bedelaan go'aanka hadii uu jiro mudac ku saabsan xaqaa'iga dacwada. Waxaa dhici karta inaad rumaysan tahay in makhraatiga dowladdu uu been sheegay, laakiin hadii uu xaakimku rumeeyo makhraatiga intii uu adiga ku rumayn lahaa ma aha kiisku mid ku wanaagsan in racfaan laga qaato. Waxa kaliya uu kiisku ku wanaagsan yahay in racfaan laga qaato haddii gadaal aad ka heshay cadeyn xoogan oo amuurta ku saabsan oo aadan haynin kolkii dacwo dhagaysiga.

Waxaa wanaagsan in aad la tashato qareen. Qareen aqoon u leh gargaarka dadweynaha ayaa ku siin kara talo xagga sharciga ah iyo haddii aad heysato sabab wanaagsan.

Intee in le'eg ayaan ku qaadan karaa racfaanka? – Taariikhda Ay Ku Egtahay Racfaanka

Amarka ugu dambeeya ee uu soo saaro Gudoomiyaha DHS waxaa laguugu soo diraa boostada, waxa aad heysataa **33 maalmood** laga bilaabo taariikhda amarka. Tani waxaa la mid ah haddii uu yahay amarkii ugu dambeeyey laga soo bilaabo dhageysiga koowaad ama amarka dib u qiimeynta.

Haddii **gacanta** lagaa saaray amarkii ugu dambeeyey, waxa aad heysataa **30 maalmood** laga soo bilaabo amarka racfaan qaadashada.



Maxaa kale oo la iga doonayaa in aan ka fikiro ka hor inta aanan diiwaangelin racfaanka?

Xusuusnoow in Maxkamadda Degmada ay talaabo qaadi karto oo kaliya haddii aad racfaan qaadato. Looma qabanayo dhageysiga si aad u soo bandhigto mar kale cadeynta oo dhan. Waxaa laga yaabaa in maxkamadda degmadu eegto cadeymaha cusub **LAAKIIN kaliya** haddii cadeynta cusub aysan aheyn mid la heli karay markii uu socday dhageysiga DHS oo ay jirto sabab macquul ah. Maxkamaddu waxa ay inta badan eegtaa haddii sarkaalka dhageystay dacwada uu sharciga si sax ah u adeegsaday.

Haddii aadan qabsan karin qareen, waa in aad weli raacdaa nidaamka u degsan maxkamadda. Waxa aad weydiisan kartaa caawinaad xafiiska adeegga dadweynaha ee maxkamadda degmada. La socodsii in aad dooneyso in aad racfaan ka qaadato go'aanka DHS. Waxaa jira sharciyo u gaar ah. **Ha hilmaamin in ay jirto taariikh u go'an racfaan qaadashada!** U weydiiso caawinaad sida ugu dhaqsaha badan.

Talaabooyinka Racfaan U Qaadashada Maxkamadda Degmada

1. Buuxi “Ogeysiiska Racfaan Qaadashada” ee ku lifaaqan

Buuxi ee ku lifaaqan ama qor qoraal aad adigu qortay ee “ogeysiiska Racfaanka” oo aad ku weydiisaneyo. Haddii aad waraaq u qorto, waa in aad xaqiijisaa in aad macluumaadkan ku soo darto:

- Hay’adda degmada ee diiday codsigaaga.
- Goorta la qabtay dhageysigaaga (bisha, maalinta iyo sanadka)
- Taariikhda amarka diidmada ah uu ku soo gaaray.
- Haddii aad codsatay ama aadan codsan dib u tixgelin.
- Haddii aad codsatay dib u tixgelin, taariikhda amarka.
- In aadan ku raacsaneyn amarka.
- Sababta aad u aaminsan tahay in amarka wax laga bedelo. Qor waxyaabaha aad is leedahay DHS way ku khaldan tahay ama faahfaahin ka bixi cadeynta cusub iyo sababta aadan u heysan markii hore.
- Soo raaci “Codsiga Qoraalka Dhageysiga.” Raac sida uu u qoran yahay foomka ku lifaaqan. Waxaa muhim kuu ah in aad hesho qoraalka dhageysiga iyo qoraalada kale ee dhageysiga. Qoraalka dhageysiga waa lacag la’aan haddii aad racfaan qaadaneyso **haddii aanu** racfaankaagu aheyn in si xun laguula dhaqmay.
- Haddii aad dooneyso in dhageysi lagu qabto
- Qor magacaaga oo sadexan iyo cinwaankaaga oo soo raaci telefoonkaaga iyo iimeylkaaga.
- Ku qor taariikhda oo saxiix.



2. Ku soo lifaaq:

- Nuqul (koobi) amarka Waaxda Adeegga Dadweynaha
- Nuqul amarka Dib U Tixgelinta haddii uu jiro.
- Nuqul cadeynta cusub haddii aad heyso

Sawir ka sameeyso warqadaha oo dhan inta aadan soo gudbin. Nuqul u dir DHS, dhinac sadexaad oo dacwadda qeyb ka ah haddii uu jiro adiguna nuqul ka reebo.

- Warqadahaaga u bandhig adeegga maxkamadda ee laga caawiyo dadweynaha si ay u eegaan ka hor inta aadan ka diiwaan gelin maxkamadda. Si [aad u hesho maxkamadda degmada](#) soo booqo www.mncourts.gov oo guji “Find Courts” ka dibna guji magaca degmada aad degan tahay.


3. Waa in aad (“gaarsiisaa”) dhamaan dhinacyada kale (tasoo lagu magacaabo cadeynta gaarsiinta)

“Gaarsiinta” waxaa loolajeedaa in boostada loogu diro ama gacanta laga saaro warqadaha racfaanka dadka kale ama hay’adaha qeybta ka ah dacwadda. Dhamaan hay’adaha ku xusan amarka kama dambeysta ah ee DHS waa in la gaarsiiyaa dhamaan qoraaladda aad maxkamadda ka diiwaangelisay oo isku mid ah. Kuwaa waxaa ku jira Gudoomiyaha Waaxda Adeegyada Bulshada (DHS), xafiiska Adeegyada Bulshada ee Degmadda, qareen wakiil ka ah xafiiska Adeegyada Bulshada haddii ay dacwo dhagaysi ay joogi lahayd arrintu.

- Gaarsiinta waxa ay noqon kartaa
Boostada loo dhigo - boosatada caadiga ah ee tigidh lagu dhajiyo
AMA
Gacanta laga gaarsiiyo - haddii aad dooneyso in aadan lacag ku bixin in aad boostada ugu dirto dhinacyada kala duwan.

4. Foomka “Cadeynta Gaarsiinta” oo la buuxiyey ayaa lagu soo celiyaa maxkamadda. Foomkani waxa uu cadeyn u yahay taariikhda warqadaha boostada la dhigay ama gacanta laga saaray.

Waxaa lagaa doonayaa in aad maxkamadda u cadeeyso in warqadaha dacwadda la gaarsiiyey dhinacyada kale. “Cadeynta Gaarsiinta” ayaa ah sida aad ku cadeyn karto. Si aad [u hesho foomka](#) soo booqo www.mncourts.gov



- Guji “Get Forms” ee jadwalka kore
- Guji “Service of Process” ee liiska
- Guji “Affidavit of Service – Combined”
- La soo deg foomka isaga oo ku qoran Word ama PDF.

Maxkamaddu waxa ay dooneysaa in ay aragto in dhinac kasta la gaarsiiyey. Taas waxa aad ku qori kartaa hal cadeyn oo gaarsiin ah oo aad ku qorto mid kasta magaciisa iyo cinwaankiisa. Ama waxa aad u sameyn kartaa mid kasta qof kasta gooni ahaantii ama hay’ad kasta goonideed.

Warqadaha waxaa lagu diri karaa boostada ama gacanta laga saari karaa LAAKIIN qofka diraya ama gacanta ka saaraya waa inuu saxiixaa “Affidavit of Service (Adeegga Gaarsiinta).”

Racfaankaaga waa la diidi karaa haddii aadan cadeyn in warqadaha maxkamadeyn loo geeey qoladda kale!

5. Ka diiwaangeli racfaanka iyo cadeynta gaarsiinta Maxkamadda Degmada.

- Ka diiwaangeli Maxkamadda Degmada qoraalka asalka ah “Ogsiiska Racfaanka”, mid kasta oo ka mid ah “Adeegga Gaarsiinta” oo dhamaantood la isku lifaaqay. [Kala soo bax cinwaanka maxkamadda](#) ee www.mncourts.gov. Ka dooro “Find Courts” (raadi maxkamadda) ka dibna geli degmada aad degan tahay.
- Lagaama doonayo lacagta diiwangelinta **haddii aadan** racfaan uga qaadaneyn dayac ama xad gudub lagu geystay.

Maxaa xiga?

Waxaa DHS kaa soo gaaray qoraaladii aad u codsatay dhageysiga (qoraalkii dhageysiga, iyo warqadihii kale. Waxa lagu soo diraa boostada. Waxa ay mararka qaarkood qaadataa ilaa 30 maalmood in ay ku soo gaaraan.

Waxa aad waraaq ka heshay Maxkamadda Degmada oo lagu wargelinayo in qaaligu dacwadaada go’aan ka gaarayo iyo lambarka dacwadda.

Haddii aad adiga ama hay'adaha kale aad weydiisateen in la qabto dhageysi, waxa ay qaadaneysaa ilaa 30 cisho ka dib marka uu idin soo gaaray qoraalka dhageysigii DHS si balan la idinkaga qabto Maxkamadda Degmada. La xiriir xafiiska Maamulaha Maxkamadda haddii aad wax su'aal ah ka qabto balanta maxkamadda.



Haddii aanay cidina weydiisan in dhageysi la qabto, qaaliga ayaa eegaya dacwadaada oo go'aan ka gaaraya 90 cisho gudahood.

Hadii aad su'aal ka qabto sida ay dacwaddu u socoto, la soo xiriir xogheynta qaaliga. U sheeg lambarka dacwadda marka aad la soo xiriirto.

FIIRO GAAR AH: La soco warqadaha lagaaga soo diro maxkamadda degmada. Si taxadar leh u akhri! Maxkamadda Degmada la socodsii cinwaanka warqadaha laguugu soo diri karo. Haddii aad guurto, la socodsii Maxkamadda Degmada markiiba adiga qoraal ahaan ugu dir cinwaanka cusub iyo lambarka dacwadda.

Maxaan yeelayaa haddii la qabanayo dhageysi maxkamadeed?

Haddii adiga iyo hay'adaha kale aad weydiisaneysaan dhageysi maxkamadeed, Maxkamadda Degmada ayaa idiin soo direysa waraaq la idinku wargelinayo taariikhda dhageysiga. Waa muhim in aad tagto oo ka qeyb qaadato dhageysiga. **Haddii aadan tagin dhageysiga, waxaa suurogal in qaaligu baabi'iyu racfaankaaga.**

Dhageysiga, waxa aad fursad u leedahay in aad qaaliga u soo bandhigto waxyaabaha aad is leedahay amarka DHS wuu ku khaldan yahay. Waa arrin wanaagsan in aad sii diyaarsato oo qorato fikradahaaga iyo waxyaabaha aad dooneyso in aad qaaliga u sheegto. Fikradaha aad qorato horay u sii qaado. Xusuusnoow in aad heysato muddo gaaban oo aad ku sharaxdo mowqifkaaga. Soo gaabi kana hadal nuxurka dacwadda.

Maxaan yeelayaa haddii aanan ku guuleysan Maxkamadda Degmada?

Dhageysiga ka dib, Maxkamadda Degmada ayaa kuu soo direysa nuqul ka mid ah go'aanka qaaliga. Haddii aadan ku raacsaneyn waxa aad racfaan uga qaadan kartaa Maxkamadda Racfaanka ee Minnesota. La tasho qareen sida racfaanka loo qaato. Waxaa jira taariikh u go'an qaadashada racfaanka, sidaa darteed qareen la tasho sida ugu dhaqsaha badan!

Maxkamaddu [waxa ay ku haysaa akhbaar faahfaahsan oo ku saabsan racfaan xareysiga](#) shabakadeeda (website) ah www.mncourts.gov

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

STATE OF MINNESOTA

DISTRICT COURT

COUNTY OF _____

JUDICIAL DISTRICT _____

Appellant (write your name here)

CASE TYPE: OTHER CIVIL
Appeal from Administrative Agency

vs.

NOTICE OF APPEAL AND
DEMAND FOR TRANSCRIPT AND
REQUEST FOR HEARING

State of Minnesota, Department of Human Services
AND (write name of County where you were denied or were receiving assistance) _____
_____ County Social/Human Services Agency

OR (name of Health Plan if it denied your services)

Other: _____, the Respondents

1. I had a hearing before a Department of Human Services hearing officer on _____ (month, day, year).
2. After the hearing, an order was mailed to me.
This written order is dated: _____. The Department of Human Services
Docket number on the order is: _____.
3. I did not submit a request for reconsideration (reconsideration is optional).

OR

- On _____ (date) I asked the Department of Human Services to
reconsider its order. An order on my request for reconsideration was mailed to
me.
The reconsideration order is dated: _____. See Minn. Stat. §
256.045, Subd. 5.
4. I disagree with this order. I am appealing the order to District Court and there is no
court filing fee. See Minn. Stat. § 256.045, Subd.7.

DEMAND FOR TRANSCRIPT: I am asking the Commissioner of Human Services to provide me, the District Court and all other parties with a transcript of any testimony from the hearing, and copies of any other papers or evidence from the hearing, without charge to me.

REQUEST FOR HEARING:

I am asking the court to schedule a hearing no sooner than 30 days **after** the court receives the transcript, so I can come to court and tell the judge why I disagree with the decision. I also ask the court to send the parties a notice of the time and date of the hearing.

OR

I am not asking for a hearing. I want the Court to make a decision based on the transcript, this Notice and the other evidence of record from the hearing.

VERIFICATION AND ACKNOWLEDGEMENTS

- a. I have read this document. To the best of my knowledge, information and belief the information contained in this document is well grounded in fact and is warranted by existing law.

- b. I have not been determined by any Court in Minnesota or in any other State to be a frivolous litigant and I am not the subject of an Order precluding me from serving or filing this document.

- c. I am not serving or filing this document for any improper purpose, such as to harass the other party or to cause delay or needless increase in the cost of litigation or to commit a fraud on the Court.

DATE: / /
 month day year

Appellant's Signature (*sign your name here*)

Appellant's name: _____

Address: _____

City, State: _____

Zip code: _____